



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Luulyo 15, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Kordhinta muddada xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha ee federaalka

Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid (CMS) **waxay kordhiyeen xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadweynaha ee federaalka (PHE) ee COVID-19** taasoo loo qorsheeyay inuu dhaco maanta, Luulyo 15, 2022, **muddo 90 maalmood ah ilaa Oktoobar 13, 2022.**

PHE waxay u ogolaatay Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS) iyo dawlada dhexe inay qaadaan talaabooyin lagu ilaalinayo caafimaadka kuwa hela adeegyada iyo ka shaqaynta nidaamka naafada koriinka ee Oregon.

Kordhintani waxay noo ogolaanaysaa wakhti dheeraad ah oo loogu diyaargarooobo u gudubka dib ugu noqoshada habraacyadayada caadiga ah. Tusaalooyinka falalka ku meel gaadhka ah iyo ka-dhaafitaanka ee dhammaan doona marka PHEdu dhammaato waxaa ka mid ah:

- Wicitaanada fiidiyowga si loo sameeyo heerka daryeelka (LOC), Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) iyo qiimeynta khatarta ee meesha fog la joogo.
- Oggolaanshaha hore u jiray iyo awooda lagu kordhinayo oggolaanshaha adeega muddo hal sano ah iyada oo aan la sameynin Qorshaha Taageerada Shakhsi (ISP) oo cusub.
- Waalidinta iyo mas'uuliyiinta carruurta yar yar ee qabta naafanimada maskaxda iyo korrinka (I/DD) ee u adeegaya daryeel bixiyaha lacagta qaata ee ilmahooda ahaan.

- Barnaamijyada adeegyada bulshada ku saleysan ee isticmaalaya oggolaansho dhanka afka ee loogu talagalay qorshayaasha adeega qofka ku saleysan.

ODDS waxa ay soo saari doontaa isgaadhsiin leh awaamirta rasmiga ah ee siyaasada iyo tilmaamaha si ay u taageeraan shaqaalaha iyo la-hawlgalayaasha iyada oo loo marayo kala-guuradan marka PHEdu dhammaato. CMS waxay ballan qaaday inay bixiso ogaysiis 60-maalmo ah ka hor inta aysan dhammaan PHE-ga.

Waad ku mahadsan tihiin dhammaan intiina daryeelaysay dadka Oregon ee qaba naafo maskaxeed iyo korriin inta lagu jiro caqabadaha xaaladdan degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee socota.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.